# Waxaan ahay dhibane fal danbiyeed. Waa maxay xaquuqahaygy?

Majiro qof rajaynaya in uu dhibane u noqdo faldanbiyeed.

Haddii jeeb tuug laguugu sameeyay, uu kusoo gaaray dhaawac culus ama aad dhibane u noqotay fal danbiyeed kale, hal shay ayaa la hubaa: Waxaa dhici karta in lagu dhaawacay ama aadba ciishoontahay, sida caadiga ahna aad ku wareersan tahay wixii aad samayn lahayd.

Qoraalkaanu wuxuu kuu sheegayaa halka aad caawimaad ka helayso xaquuqahaagu waxay yihiin.

**Yaa i caawin kara?**

Waxaa jiro tiro ururo ah oo caawiya dhibanaha kuwaas oo ku siin kara tallo iyo kaalmo. Ururadaan waxaa maamula shakhsiyaad si gaar ah loogu tababaray oo khibrad fara badan u leh caawinta dadka marxaladdaada oo kale kujira. Waxay halkaas u joogaan inay ku dhegaystaan kuna caawiyaan. Ayada oo ay ku xiran tahay baahiyahaaga gaarka ah, su'aalahaanu waxay gacan ka gaysan karaan sidii aad u heli lahayd kaalmo dheeraad ah sida tallo bixin ama baxnaano.

Waxaad ka heli kartaa cidda ay tahay in aad u tagto **www.hilfe-info.de**

Dabcan, waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa saldhigga booliska ee kuugu dhow.

**Sidee ayaan kusoo gudbin karaa warbixinta faldanbiyeedka una codsa karaa dacwad ku saabsan faldanbiyeed? Iyo waxa intaas kaddib dhacaaya?**

Haddii aad doonayso in aad faldanbiyeed soo gudbiso, waa in aad la xiriirtaa saldhigga booliska ee kuugu dhaw. Fal danbiyeedyada waxaa sidoo kale loo soo gudbin karaa xaafiiska dacwad oogaha guud. Marka aad si rasmi ah usoo gudbiso faldanbiyeed, howshaas lagama laaban karo. Arrintaan waxaa sabab u ah booliska iyo dacwad oogeyaasha Jarmalka wuxuu sharcigu waajib uga dhigayaa inay baaraan danbi kasta oo loosoo gudbiyo.

Waxaa jirta kaliya tiro yar oo danbiyada fudud ah kuwaas oo uu dhibanuhu kala dooran karo in uu dacwad ka gudbinayo iyo in kale (tusaale ahaan: aflagaaddada ama waxyeelo hantiyadeed). Gudaha dalka Jarmalka, faldanbiyeedyadaan waa la isku dacweeyaa "marka lasoo codsado." Tanoo micnaheedu yahay in saraakiishu ay dacwad kusoo oogayaan faldanbiyeedka kaliya haddii aad adiga, oo ah dhibanaha, aad si gaar ah ugu sheegto in ay sidaa sameeyaan. Marka la eego xaaladahaan waxaad haysataa wakhti kama danbays ah oo saddex bilood ah si aad saraakiisha ugu soo gudbiso si ay dacwad ugu soo oogaan faldanbiyrrdka kaddib marka aad ogaato faldanbiyeedka iyo qofka danbiilaha ah.

**Maxaa dhacaaya haddii aanan fahmin ama aan dhibaato ku qabo fahamka luuqadda Jarmalka?**

Taasi dhib malahan. Haddii aad doonayso inaad faldanbiyeed soo gudbiso, qof ayaa ku caawin doona! Haddii laguu waraysanayo markhaati ahaan, waxaad xaq u yelanaysaa in aad tarjumaan hesho. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah aadna lahayn aqoon fiican oo luuqadda Jarmalka ah, waxaad codsan kartaa in macluumaadka laguugu siiyo luuqad aad fahmi karto.

Waa maxay macluumaadka aan heli karo ee ku saabsan sida kiiskaygu u socdo?

Haddii aad dhibane u tahay faldanbiyeed, waxaad ogaan kartaa sida kiiskaagu ku socdo waxaadna heli kartaa macluumaad ka imaanaya faylka kiiska. Haddii aad doonayso in aad hesho macluumaad, shayga ugu wanaagsan ee lagaa rabo in aad samayso waa in aad booliska u sheegto arrintaan marka aad faldanbiyeedka usoo gudbinayso. Waa in aad sidoo kale u sheegto macluumaadka ada doonayso in aad hesho. Marka aad macluumaadkaan codsato:

- Waxaad heli doontaa dukumiinti kooban oo xaqiijinaya in aad faldanbiyeedka usoo gudbisay saraakiisha.
- Waa laguu soo sheegi doonaa haddii xaafiiska dacwad ooguhu go'aansado in uu joojiyo kiiska, sida in uusan maxkamaddda gaynayn.
- Haddii kiiska maxkamad la geeyo, waa laguu sheegi doonaa xiliga iyo goobta dacwaddu ka dhici doonto iyo waxa qofka la dacweynayo lagu soo eedeeyay.
- Waxaa laguu sheegi doonaa natiijada kasoo baxda dacwadda. Arrintaan micnaheedu waa in laguu sheegi doono in qofka la dacweeyaha ah lagu helay danbi ama in uu yahay bilaa danbi, iyo in dacwaddii la joojiyay ayada oo aan xukun laga soo saarin iyo in kale.
- Waxaa laguu sheegi doonaa in qofka ku khuseeya uu xiranyahay iyo in kale. Waxaa sidoo kale laguugu wargalin doonaa haddii loo ogolaado in uu xabsiga ka baxo ama ka fakado.
- Haddii qofka danbi lagu helo, waa lagu soo sheegi doonaa haddii laga mamnuucay inuu kula soo xiriiro iyo in kale.

Xaaladaha qaarkood waxaad sidoo kale codsan kartaa in aad hesho macluumaadka ama nuqulada faylasha kiisaska. Tusaale ahaan, haddii aad la kulantay shil waddada kaasoo gaara, waxaad u baahanaysaa inaad sawir ka bixiso qaabka shilku u dhacay si aad u hesho magdhowga waxyeelada iyo/ama xanuunka iyo dhibaatada kusoo gaartay. Waxaad nuqul sawiradaan ah ka codsan kartaa faylasha kiiska. Haddii aadan lug ku lahayn maxkamadaynta adiga oo ah waxa loogu yeero "dacwad ooge gaar ah" (ereygaan waxaa lagu sharaxay bogga 3!) waa in aad sharaxdaa sababta aad ugu baahan tahay macluumaadkaan. Waxaa suurtagal ah in waxyaabaha qaar laga reebo kiisaska qaar.

**Warbixintaada ka markhaati ahaan**

Maadaama aad tahay dhibane waxaad qayb muhiim ah ka cayaari kartaa dacwadda faldanbiyeedka: waxaad tahay markhaati. Shaqada ugu muhiimsan ee markhaatigu waa in uu bixiyaa maragfur dhammaystiran oo run ah. Waa kaalmo wax ku ool u ah saraakiisha baaritaanka haddii aad xiliga dhegaysiga dacwadda aad keento dukumiintiyada aad hayso (sida shahaadada caafimaadka ama sawiraanta). Xaaladaha intooda badan waxaad warbixintaada markhaatiga u gudbin doontaa booliska. Xaaladaha intooda badan waxaad sidoo kale u bahaan doontaa in aad hadhow markhaatiga ka furto maxkamadda. Kaliya kiisaska gaarka ah ayaan lagaa doonayn in aad maragfur samayso. Arintaani waxay khusaysaa, tusaale ahaan, haddii aad guursatay ama ama aad ugu dhowdahay qofka lagu soo eedeeyay fadanbiyeedka. Marka la eego kiisaskaan uma baahnid inaad wax sheegto.

Waa inaad soo gudbisaa magacaaga iyo ciwaankaaga marka lagu weydiiyo inta dacwaddu socoto. Uma baahnid inaad tafaasiishaan bixiso haddii aad kujirto khatar, sida haddii qof uu kugu handaday inuu ku waxyeelaynayo haddii aad saraakiisha sharciga u tagto. Xaaladdaanu marka ay dhacdo, uma baahnid in aad bixiso ciwaankaaga guriga; waxaad bixin kartaa ciwaan kale si hay'adaha sharcigu kuula soo xiriiraan. Tusaale ahaan, waxaad tafaasiisha siin kartaa urur dhibanaha caawiya oo aad xiriir la leedahay. Haddii aad ka maragfurto maxkamadda horteeda qofka lagu eedeeyay faldanbiyeedkuna xaadir yahay, laguma weydiin doono ciwaankaaga oo buuxa, laakiin waxaa kaliya lagu weydiin doonaa goobta aad degentahay. Haddii aad khatar ku sugantahay (sida kor ku faahfaahsan), sidoo kale uma baahnid in aad goobta aad degentahay sheegto.

In markhaati noqdo waa xaalad dadka intooda badan aysan aqoon u lahayn, waxayna noqon kartaa mid adag. Si arrimaha loo fududeeyo, waxaa laguu ogolyahay in aad qof soo wadato marka aad markhaati furayso. Wuxuu noqon karaa qaraabo ama saaxiib. Waa uu kula joogi karaa marka lagu weydiinayo su'aalaha ku saabsan maragfurka. Qofkaan waxaa loo sheegi doonaa in uu qolka ka baxo marka lagu jiro xaalado gaar ah. Waxaa sidoo kale laguu ogolyahay inuu garyaqaan kula joogo. Xaaladaha gaarka ah qaarkood dowladda ayaa xataa bixin doonta lacagta garyaqaanka si uu kuu caawiyo xiliga su'aalo weydiinta. Haddii aad aaminsan tahay inaad u baahan tahay kaalmada noocaas ah xiliga su'aalo weydiinta, haddii ay ahaan lahayd booliska, xaafiiska dacwad oogaha guud ama maxkamadda, waa in aad weydiisaa qofka diyaarinaya dacwadda marka ugu horeysa ee ay fursaddu kuu saaamaxdo, tusaale kahor inta uusan bilaabin in uu su'aalo ku weydiiyo.

## Kaalmada maskaxda dadka ee dacwadda maxkamadda laga helo

Ilaa 2017, kaalmo dhanka xirfadda ah (oo logu yeero adeegyada kaalmada maskaxda dadka oo kajirta dacwadaha maxkamadaha) ayaa waddanka oo dhan laga heli karay guud ahaanba dacwadaha faldanbiyeedyada kiisaska qaar. Gaar ahaan, caruurta iyo dadka da'yarta ee dhibnaha u noqday dhibaatada iyo xadgudubka dhanka galmada ah ayaa xaq u leh kaalmada noocaas ah. Laakiin dadka waaweyn ee dhibaneyaasha u ah dhibaatada ama xadgudubka galmada ah ayaa u baahan kara in kaalmada noocaas ah la siiyo.

Kaalmada dhanka maskaxda bulshada ah waa mid bilaash ay ku heli karaan dhibaneyaashu haddii maxkamaddu aqbasho. Dhammaan xaaladaha kale, waa in aad iska daboosho kharashaadka kaalmada dhanka maskaxda bulshada ah. Si aad u hesho xog dheeraad ah, haka labalabayn in aad la xiriirto saldhigga booliska ee kuugu dhow ama urur kaalmeeya dhibanaha.

Waxada sidoo kale macluumaad balaaran oo ku saabsan kaalmada dhanka maskaxda bulshada ah ee dacwadda maxkamadda si oonleen ah barta → **www.hilfe-info.de**

## Ma kusoo biiri karaa dhegaysiga dacwadda?

Haddii aad dhibane u ahayd faldanbiyeedyo gaar ah, waxaad ku biiri kartaa dacwad oogista kiiskaaga sida loogu yeero "dacwad oogista gaarka ah." Waxada noqon kartaa dacwad ooge gara ah haddii aad dhibane u tahay faldanbiyeed lamid ah sida kan kufsiga, xadgudub galmo ama iskuday dil, ama haddii faldanbiyeedka ay ka dhalatay geerida qof qaraabo ah oo kugu dhawaa. Maadaama aad tahay dacwad ooge gaar ah, waxaa lagu siiyay xaquuq gaar ah. Tusaale ahaan, qareenkaagu wuxuu baari karaa faylasha faldanbiyeedka asaga oo adiga ku matalaya asaga oo aan la imaan sababo gaar ah, wuxuuna sidoo kale gudbin karaa codsi meel kasta oo ay dacwadu maraysaba. Intaas waxaa dheer, waxaad k qaybqaadan kartaa dhammaan qaybaha maxkamadda, taasoo aan loo ogolayn markhaatiyada kale.

## Yaa bixinaya lacagta qareenkayga?

In aad qareen shaqaalaysiisato waxay noqon kartaa mid kharash badan. Haddii qofka la dacweynaayo danbiga lagu helo, asaga ama ayada ayaa laga rabaa in uu kharashka qareenka bixiyo. Hase yeeshee, ma ahan in qof kasta oo danbi lagu helo uu awood u leeyahay in kharashaadkaan bixiyo. Waxaa lagaaga baahan karaa in aad kharshka qaar iska bixiso.

Xaaladaha gaarka ah qaarkood waxaad maxkamadda weydiisan kartaa in ay kuu magacowdo qareen uu gobalku lacagtiisa bixinayo. Waad samayn kartaa arrinkaan, tusaale ahaan, haddii ada dhibane u tahay dhibaato ama danbi galmo ah, ama faldanbiyeed horseeday dhimashada qof qaraabadaada ah oo kugu dhow, sida canuggaaga, hooyadaa, aaabahaa, ninkaaga ama xaaskaaga. Xaaladdaanu marka ay dhacdo, gobolka ayaa bixinaya kharashka qareenkaaga xataa haddii aad lacag aad iskaga bixiso haysato.

Waxada sidoo kale maxkamadda weydiisan kartaa inay kaa caawiso talo bixinta dhanka sharciga ah ee kiisaskaan. Arrintaani waxay ku khusaysaa haddii aadan haysan lacag badan xaqna aad u leedahay in aad ahaato dacwad ooge gaar ah.

### Magdhowga iyo waxyeelada xanuunka iyo dhibaatada

Ma la kulantay waxyeello kaa soo gaartay faldanbiyeed, amase ma jeclaan lahayd in aad hesho magdhowga xanuun yo dhibaato? Ma doonaysaa in aad cabashooyinkaan samayso inta dacwaddu socoto? Arrintaan sida caadiga ah waa mid suurtogal ah. Si aad ugu "darto" ashtakooyinkaaga magdhowga dacwadda, si kastaba ha noqotee, waa in aad marka koowaad soo gudbisaa codsi gaar ah. Haddii aad doonayso in aad cabasho samayso, waa in aad soo cadaysa xiliyada hore –sida ugu fiican waa marka aad faldanbiyeedka usoo gudbinayso saraakiisha sahrciga.

Waxaad sidoo kale magdhowga ka codsan kartaa meel ka baxsan dacwadda maxkamadda. Marka xaaladdu sidaan tahay waa in aad maxkamad madani ah tagtaa.

Labada xaaladoodba, waxaad maxkamadda weydiisan kartaa kaalmo dhaqaale si aad u hesho tallo bixin dhanka sharciga ah haddii dakhligaagu aad u hooseeyo.

### Waa maxay xaquuqaha kale ee aan leeyahay?

Majirtaa waxyeelo soo garatay caafimaadkaaga taasoo ka dhalatay faldanbiyeed? haddii ay sidaas tahay, sharcigu wuxuu kuu ogolaanayaa in aad hesho kaalmooyinka gobolku bixiyo. Tusaale ahaan, waxaad heli kartaa kaalmada aad isga abixinayso daaweynta caafimaadka a,a la talinta, ama aad kusoo iibsan karto qalabka sida usha, qalabka lagu socdo ama gaari curyaanka. Waxaad sidoo kale kaalmo ku heli kartaa qaab hawlgabnimo sh (tusaale magdhowga luminta dakhliga). Booliska ayaad arrintaan wax ka weydiin kartaa marka ugu horeysa ee aad faldanbiyeedka soo sheegto. Waxay kuu gudbin karaan maamulka ku shaqada leh.

Xarun loogu talagalay dhibaatooyinka soo gaara bukaan socotada ayaa sidoo kale diyaar u ah si kiisaska xaaladaha degdega ah ay u helaan kaalmo dhanka baxnaanda maskaxda ah oo toos ah dhakhsona ah. Uma baahnid in aad horey iskaga sii diiwaangaliso.

Haddii aad dhibane u noqotay weerarada argagixisada ma faldanbiyeed dad xagjir ah, waxada kaalmo dhaqaale ka codsan kartaa Xaafiiska Cadaaladda ee Federaalka (BfJ). Waxaad waxyaabo badan oo ku saabsan in aad xaq u leedahay kaalmadaan iyo in kale iyo qaabka aad ku codsan karto ka heli kartaa: → **www.bundesjustizamt.de** (search for: Bürgerdienste → Härteleistungen)

Haddii aad dhibane u noqotay xadgudub qoyska ah, sharciga Jarmalku wuxuu sheegayaa in aad u baahan tahay ilaalin dheeraad ah. Tusaale ahaan, waxaad maxkamadda deegaanka (maxkamadda qoyska) weydiisan kartaa inay ka horistaagto qofka waxyeelada kuu gaystay in uu xiriir kula soo sameeyo. Sidoo kale, haddii aad gurigaaga qof kale la wadaagto kaasoo ku waxyeelaynaya, maxkamaddu waxay ku siin kartaa xaquuq aad kaligaa ku noolaan karto. Waxaad soo gudbin kartaa codsiyada ku socda maxkamadda ayaga oo qoraal ah, ama waxaad la hadli kartaa isla maxkamadda waxayna islamarkiiba gudbin doonaan codsigaaga. Uma baahnid in uu qareen ku matalo.

Waxaad sidoo kale xaq u leedahay kaalmooyinka kujira nidaamka sharciga caymiska shilalka. Arrintaani waxay dhici kartaa marka ay waxyeelo kusoo gaarto adiga oo qabanaya shaqo xirfadeed, la safraya koox aad fasalka dugsiga isla dhigataan ama aqoon kororsiga jaamacadda, ama isku dayaya caawinta dad kale oo shil galay ama xaalad degdeg ah. Guudmarka dhaqaalaha loogu tala galay caymiska shilka iyo ururada mas'uuliyadaha loo shaqeeyaha waxaa laga heli karaa websaytka ururka Deutsche Gesetzliche Unfallversicherung (DGUV) → **www.dguv.de** → (Ururka iyo Qaab dhismeedka → Shaqooyinka).

**Waa maxay dhexdhexaadinta danbiilaha iyo dhibanuhu?**

Dhexdhexaadinta danbiilaha iyo dhibanahu waa hanaan loo qaabeeyay, oo ay waxyaabo kale kujiraan, si dhibanayaasha faldanbiyeedka looga caawiyo kasoo kabashada dhibaatadii ku dhacday. Si ka duwan maxkamadayn faldanbiyeed, danbiileyaashu waa in ay sameeyaan dadaalo toos ah oo gaar ah si ay u bogsiiyaan waxyeelada iyo dhaawaca ay ku sababeen dhibanaha kulan fool-ka-fool ah. Dhibanuhu waxaa laga yaabaa in ay soo gaarto waxyeelo dhaqaale, waxyeelo dhanka maskaxda la xariirta ama dhaawac jireed, ama in uu la dhibtoodo welwel uu faldanbiyeedku u gaystay. Dhexdhexaadin waxaa loola danleeyahay in lagu xaliyo dhibaatooyinkaan. Wada xaajoodku wuxuu inta badan dhacaa ayada oo la kaashanayo tallo bixiye dhabka xasilinta ah oo u tababaran, laakiin wuxuu sidoo kale dhici karaa kulan fool-ka-fool ah iyo kaliya ayada oo la adeegsanayo dhexdhexaadiye haddii aadrabto.

Dhexdhexaadinta danbiilaha iyo dhibanaha marna looma samaynayo qaan kasoo horjeeda rabitaanka dhibanaha. Sidoo kale, waxaa kaliya la bixin karaa haddii danbiiluhu si xooggan uu u aqbalo mas'uuliyadda waxa uu sameeyay ama ay samaysay. Xaaladaha ku habboon, dhexdhexaadinta danbiilaha iyo dhibanuhu waxay awood u siin kartaa dhibaneyaasha sidii ay ayagu u maarayn lahaayeen iskudhaca, una soo ceshan lahaayeen xiriur nabadgalyo ah si sharciga waafaqsan. Booliska iyo dacwad oogeyaashu waxay markasta doorbidi doonaan khiyaarkaan. Hase yeeshee, qayb kama ahan dacwada faldanbiyeedka, si gaar ah ayayna u dhacaysaa. Dhexdhexaadinta danbiilaha iyo dhibanaha waxaa bixiya ururo ku takhasusay oo shaqaalaysiista dhexdhexaadiyeyaal tababaran.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhexdhexaadinta danbiilaha iyo dhibanaha iyo ururada bixiya ee deegaankaaga kajira waxaad ka heli kartaa onleenka, sida → **www.toa-servicebuero.de/konfliktschlichter** or at → **www.bag-toa.de**

# Warbixinada iyo lifaaqyadaa

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta dhibanaha ka heli **www.hilfe-info.de**

Waxada sidoo kale macluumaad ku caawinaya ka heli doontaa warbixnada soo socda:

- **Hagaha dhibanaha**
- **Ich habe Rechte (“Xaquuq ayaan leeyahay”) (Jarmal ahaan)**
- **Mehr Schutz bei häuslicher Gewalt ("Difaac balaaran ee kiisaska xadgudubyada qoyska") (Jarmal ahaan)**
- **Kaalmada tallo bixinta iyo kaalmada kharashaadka maxkamadda** dhammaan waxaa laga heli **www.bmj.de/Publikationen**
- **Hilfe für Opfer von Gewalttaten (“Assistance for victims of violent crime”) (in German)** at **www.bmas.de/opferentschaedigung**

**Dalbashada warbixinta daabacan:**
**www.bmj.de**

**Xaafiiska Daabacaadaha ee Dowladda Federaalka:**
Postfach 85 05 481009
18132 Rostock
Teleefoonka: (030) 10 272 272 1
Fakiska: (030) 18 10 272 272 1

**Gobolka Niedersachsen waxaa ka jira dhowr xarumod oo talo iyo taageero laga siiyo dhibanayaasha faldambiyeedka laga galay:**

Taageeradu waxaa la siinayaa dhammaan dhibanayaasha dembiyada laga galay iyo qoysaskooda waana lacag la'aan. Xirfadlayaal si gaar ah u tababaran ayaa ka shaqeeya xarumaha taageerada iyo talada ee hoos ku taxan. Waxay khibrad u leeyihiin dadka xaaladaada ku jira. Way ku dhegaystaan oo ku caawiyaan. Iyadoo ku xiran baahidaada, waxay sidoo kale ku siin karaan caawimaad iyo macluumaad dheeraad ah, tusaale ahaan mawduucyada soo socda:

- Caawinaad nafsaani oo degdeg ah oo laga helo rugaha daawaynta dhaawacyada,
- Codsiyada hoos yimaada Xeerka Ilaalinta Rabshadaha,
- Dukumeenti cadeynaya rabshadaha guriga iyo/ama galmoodka ee ka madax banaan warbixinta booliiska (shabakadda ProBeweis),
- Arjiga dacwada iyo arjiga ciqaabta
- Macluumaad ku saabsan habsocodka kiiska dacwada,
- Faalada markhaatiga,
- Wehelka markhaatiga,
- Dacwad dheeraad oo gaar ah,
- Magdhowga ama qaanta xanuunka (habraaca adhesion),
- Fursadaha taageerada maaliyadeed,
- Magdhowga isu-dheelitirka dambiilaha-dhibanaha iyo
- Taageerada caqabadaha luqadda (ay ku jirto turjumaada luqadda dhegoolaha, iwm.).

**Machadka taageerada dhibbanaha ee Niedersachsen oo leh 11 xafiis oo taageerada dhibbanaha**
Macluumaad ku saabsan dalabyada iyo faahfaahinta xiriirka ee xafiisyada waxaa laga heli karaa:
**www.opferhilfe.niedersachsen.de**
Telefon: 0441/220-1111

**Taageerada habka cilmi-nafsiga bulshada**
Caawinta maxkamadu waa taageero degdeg ah oo gaar ah oo loogu talagalay dhibanayaasha habsocodka dacwada dembiyada falaka dembiyada ee dacwadaha dembiyada. Wixii macluumaad ah eeg:
**www.justizportal.niedersachsen.de/Prozessbegleitung**
Telefon: 0511/120-8728

Waxa kale oo aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah iyo taageero halkan:

**Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka Niedersachsen ee Ilaalinta Dhibanaha**
Macluumaadka ku saabsan adeegga la-talinta iyo dhexdhexaadinta dhexe iyo sida loola xiriiro xafiiska wakiilka gobolka waxaa laga heli karaa::
**www.mj.niedersachsen.de/opferschutzbeauftragter**
Telefon: 0511/120-8737

**WEISSER RING e.V. oo leh 41 xafiisyo oo ku yaal Niedersachsen**
Macluumaadka ku saabsan soo jeedinta WEISSEN RING e. V. iyo xafiisyada laamaha ee Niedersachsen waxaa laga heli karaa:
**www.niedersachsen.weisser-ring.de**
Dhibanaha-Telefon: 116 006 (lacag la´aan)

Dulmar, macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada iyo taageeradaada iyo sidoo kale dulmar guud oo ku saabsan xiriirka iyo xarumaha la-talinta ee Niedersachsen ayaa la heli karaa websaaydhka:
**www.opferschutz-niedersachsen.de**